# Qaab-dhismeedka Cusub Ee

# Ciidanka Boliiska Soomaaliyeed

**June 24, 2016**

**Baydhabo, Soomaaliya**

## Arar

- Waxaa halkan kusoo bandhigi doonnaa habraaca ugu habboon ee lagu dhisi karo ciidan boliis ee u kala baxa heer federaal iyo heer Dawlad-goboleed.

- Inta ay socoto hawshan ee bilowga ah, waxaa loo baahan yahay inuu noqdo joogto xiriirka u dhaxeeya Madaxda Boliiska Federaalka iyo kuwa Dawlad-goboledyada, xiriirkaas oo u xuubsiiban kara haddii la joogteeyo isfahan guud iyo aragti mideysan ; si loo helo ciidan boliis oo la jaanqaadi kara xaaladaan kala guurka ah.

- Waxaan is xasuusinaynaa taariikhda Boliiska ee 72 jirsatay ee kasoo bilaabatay 1943 oo ah xilligii la aasaasay Ciidanka Boliiska Soomaaliyeed, Boliiska Soomaaliyeed wuxuu soo maray waaya kala duwan , wuxuuna lasoo shaqeeyay xukuumado fara badan, waxaana mar walba saldhig u ahaa hawsha Boliiska dhawrista sharciyada, hirgelinta caddaaladda, ilaalinta canshuuraha, soo celinta nidaamka iyo kala dambaynta, la dagaalanaka anshax xumada iyo dhawrista nidaamka guud ee nabadgelyada.

- Waayahaas taariikheed ee uu Boliisku soo maray waxay mar walba ujeedkoodu ahaa u adeegidda Ummadda Soomaaliyeed iyo inay nabad ku wada noolaadaan, mar walbana wuxuu Boliisku ilaalin jiray mabda'a ah eex la'aan iyo farsamo ku dhisan aqoon inuu shaqadiisa u qabsado.

## Qoddobka 1aad

## Labada Heer ee Ciidanka Boliiska

- Ciidanka Boliiska Soomaaliyeed wuxuu u kala baxayaa sidatan:

    1. Ciidanka Boliiska Federaalka.
    2. Ciidanka Boliiska Dawlad Goboleedyada.

## Waajibaadka Ciidanka Boliiska Dawlad Goboleedka

- Ilaalinta Nabadgelyada iyo Xasiloonida Dadweynaha, Ilaalinta Nafta, Nabadgelyada Qofka iyo hantidiisa iyo Isticmaalka Xaqa uu qofka siinayo Sharcigu, iyadoo aan wax loo dhimin Nabadgelyada.
- Ka qayb qaadashada la dagaalanka Argagixisada iyo Burcad Badeedka
- Inay ka qayb qaataan Ilaalinta Xuduudaha.
- Ilaalinta Xarumaha maamulka Dawlad Goboleedka.
- Dhawrista Sharciga iyo kala dambeynta.
- Ka hortegista iyo Baarista Dembiyada iyo qabasahada Dembiilayaasha sida gaarka ah sharcigu faraayo inuu qabto Boliiska Dawladgoboleedka.
- Ka hortagga rabshadaha ka dhaca nawaaxiga maamul goboleedka.
- Ka qaybqaadashada iyo qabashada hawlaha uu farayo sharcigu.
- U gurmashada dadweynaha haddii ay dhacdo musiibo guud ama mid gaar ahaaneed iyo abuurista hayadaha difaaca madaniga ah ee Nawaaxigooda.

## Waajibaadka Boliiska Federaalka

- Difaaca Waaxaha Qaranka.
- Ła dagaalanka Dembiyada abaabulan, kuwa lidka ku ah Qarannimada iyo Dembiyada lidka ku ah Diinta, Dhaqanka, iyo Dhaqaalaha.
- Hawlaha Socdaalka, Baasaboorrada iyo Jinsiyadaha.
- Inuu gacan siiyo Boliiska Dawlad-goboleedyada
- Ka hortagga iyo wax ka qabashada isku dhacyada Xuduudeed ee Maamul Goboleedyada.
- Xiriirka Caalamiga ah ee Boliiska sida Interpol
- Inuu diyaariyo isla markaasna hirgeliyo manhaj tababar meheradeed mideysan.
- Ilaalinta Safaaradaha, Shirkadaha Shisheeye iyo Hay'adaha Caalamiga ah.
- Hirgelinta Sharciyada, Xeerarka Guud iyo kuwa Gaar ahaaneed, amarada Madaxda iyo faritaannada danta Dhaqaalaha iyo Siyaasadda.
- Dhammaan hawlaha ku dhisan farsamo iyo xirfad gaar ahaaneed una baahan qarash fara badan.

## Qoddobka 2aad

## Maamulka Siyaasadeed

- Ciidanka Boliiska Federaalka wuxuu hoos tagayaa Wasiirka Wasaaradda Amniga Gudaha ee Dawladda Federaalka.
- Ciidanka Boliiska Dawlad-goboleedyada wuxuu hoos tagayaa Wasiirka Wasaaradda Amniga Dawlad Goboleedka.

## Qoddobka 3aad

## Magacaabidda Taliyeyaasha Ciidanka Boliiska

- Magacaabidda Taliyaha Boliiska Federaalka waxaa soojeedinaya Wasiirka Amniga Gudaha waxaana ansixinaya Golaha Wasiirada kadibna waxaa oggolaanaya Madaxweynaha Dawladda Federaalka waxaana lagu soo saaraya Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

- Magacaabidda Taliyaha Ciidanka Boliiska Dawlad-goboleedyada waxaa soojeedinaya Wasiirka Amniga Dawlad-goboleedka waxaana ansixinaya Golaha Wasiirada Dawlad-goboleedka kadibna waxaana lagu soo saarayaa go'aan Madaxweyne Dawladda Goboleed.

## Qoddobka 4aad

## Sharciyadda Boliiska

- Sharciga Boliisku uu ku dhisan yahay waa soo saari doona labada Baarlamaan waana inay iska hor imaanin:
- Sharciga Boliiska Federaalka ah waxaa la marsiinayaa Baarlamaanka Federaalka ah.
- Sharciga Boliiska Dawlad-goboleedyada waxaa la marsiinayaa Baarlamaanka Dawlad-goboleedyada.

## Qoddobka 5aad

## Miisaaniyadda Boliiska

- Miisaaniyadda Boliiska Federaalka ah waxaa bixinaya Dawladda Federaalka.
- Miisaaniyadda Boliiska Dawlad-goboleedyada waxaa bixinaya Dawlad-goboleedyada.
- Deeqda Beesha Caalamku siiyaan Boliiska waxaa loo qaybsanayaa si caddaalad ah oo isu dheeli tiran.

**Qodobka 6aad**

**Qorista iyo Tababarka Xubnaha Ciidanka Boliiska**

- Jaangooyada Siyaasadda Dawlad-goboleedka ayay ku xiran tahay tirada Ciidanka Boliiska ee Dawlad Goboleedku u baahan tahay inay qorato.
- Xubnaha Ciidanka Boliiska Dawladgoboleedka waxaa soo xulaya ama qoraya Taliska Ciidanka Boliiska ee Dawladgoboleedka.
- Xubnaha Boliiska Dawlad-goboleedka kama mid aha Ciidamada Qalabka Sida ee Jamhuuriyadda.
- Waxaa la samaynayaa Manhaj Tababar oo mideysan lakiin hirgelinta manhajka waa laga rabaa dawladgoboleedka.
- Waxaa jiri doona Lebbis iyo qaab shaqo oo mideysan laakiin astaan kala duwan.
- Waxaa la sameynayaa Dugsiyo Tababar Heer Qaran iyo Heer Gobol .

**Qodobka 7aad**

**Amniga Gobollada Aan Weli Maamul Samaysanin**

- Waxaa masuul ka ah qaybaha Boliiska ee heer gobol ayagoo hoos imaanaya Taliyaha Ciidanka Boliiska Federaalka ah, lana shaqeynaya Guddoomiyaha Gobolka inta ay ka sameysanayaan dawlad goboleed ama la qeexayo maqaamka magaala madaxda Muqdisho.

## Qoddobka 8aad

### Labada Heer ee Ciidanka Daraawiishta

- **Ciidanka Daraawiishta Boliiska Soomaaliyeed wuxuu kula baxayaa sidatan:**
  1. Ciidanka Daraawiishta  Boliiska Federaalka
  2. Ciidanka Daraawiishta Dawlad-goboleedyada

### Waajibaadka Daraawiishta Boliiska Federaalka waa :

- Ilaalinta Xuduudaha Qaranka
- Ilaalinta Goobaha muhiimka ah ee Dawladda iyo Madaxda.
- Inay wax ka qabtaan dagaallada iyo isku dhacyada u dhaxeeya Dawlad-goboledyada.
- Gurmad inay fidiyaan haddii ay jirto musiibo qaran ama mid gaar ah
- Waxay qayb ka yihiin difaaca qaranka haddii dalku uu galo xaalad dagaal ama lasoo weeraro.

### Waajibaadka Daraawiishta Dawladgoboledyada

- La dagaalanka Argagixisada gudaha Dawlad-goboleedka
- La tacaalidda iyo wax ka qabashada kacdoonnada hubeysan ee ka jira Dawlad-goboledka.
- Fulinta manhajka tababarka xubnaha cusub ee loo qaatay Boliiska Dawlad-goboleedka.

### Wajibaadka Birmadka Heer Dawlad-goboleed

- Ka hortagga rabshadaha gudaha Dawlad Goboleedka.
- Ilaalinta Xarumaha iyo Madaxda Dawlad Goboledka.
- Sugidda ammaanka Munaasabadaha waaweyn ee bulshada ku dhaqan Dawlad Goboleedka.

## Qodobka 9aad

## Baarista Dembiyada

- CID waa Hoggaanka Dembi Baarista Federaalka.

**Kiisaska CID ay baarto waxaa ka mid :**

1. Dil wadareed ama Xasuuq
2. Qaraxyada geysta waxyeellada baahsan
3. Booliqaran
4. Mukhaadaraadka Waaweyn ee isaga gudba xuduudada
5. Sameynta , bedelidda iyo isticmaalka lacagaha beenta ah
6. Shaabadaha iyo farankaboolada Dawladda
7. Sameynta, kabeecmushtaridda iyo haysashada hubka iyo waxyaabaha qarxa.
8. Kiisaska sumeynta Ballaaran.
9. Adoonsiga, Isxambaarka sharci darrada ah iyo Tahriibka.
10. Halis-gelinta, baabi'inta iyo cuuryaaminta beeraha, warshadaha , iyo meelaha kale ee halbowlaha u ah dhaqaalaha dalka.
11. Tuugada waaweyn ee xuduudaha isaga gudubta.
12. Sameyn warqad ama bedelidda mid rasmi ah.
13. Barxidda iyo u ekeysiin waxyaalaha la cuno iyo dawooyinka
14. Dembiyada xuduudaha isaga gudba.
15. Dembiyada lidka ku ah danjirayaasha shisheeyaha ah waxaa iska kaashanaya Unugga Dembi Baarista Dawlad-goboleedyada iyo CID.
16. Dembiyada lidka ku ah Qarannimada Soomaaliyeed qod184 – 239 X.C.S.sida Basaasnimada IWM.

- Dawladgoboledyada waxay yeelanayaan Unug Dembi Baariseed oo ku eg Heer Dawlad Goboleed kuwaasoo qabanaya hawlaha baarista Boliiska ee Maamul Goboleedka.
- Waxaa jiri doona isbedel lagu samaynayo Xeerka Ciqaabta Soomaaliyeed. oo loo kala saari doono dembiyada kuwo ay baarayso CID Federaal ah iyo Dembiyo ay baari karaan Qaybaha Baarista ee Dawlada Goboleedyada.

## Qodobka 10aad

## Boliiska Diblomaasiyiinta iyo Hay'daha Federaalka ah

Waajibaadkiisa guud waxaa ka mid ah:

- Ilaalinta Safaaradaha Shisheeye
- Ilaalinta Hay'adaha Caalamiga ah
- Ilaalinta Hay'adaha Dawladda Federaalka ah
- Ilaalinta Shirkadaha Ajaanibta ah
- Galbinta Madaxda Qaranka iyo Danjireyaasha.

## Qodobka.11aad

## Boliiska Ilaalinta Canshuuraha

### Waajibaadka Ciidanka Ilaalinta Canshuuraha

Haddaba ciidanka hoos yimaada Hoggaanka Ilaalinta Canshuuraha , ayagoo guud ahaan kala mid ah xagga waajibaadka Ciidanka Boliiska Federaalka, waxaa xil gaar ah ka saaran yahay fulinta hawlaha hoos ku qoran :

1. Ka hortagga, baarista iyo qabashada dembiyada lidka ku ah shuruucda maaliyadda iyo dhaqaalaha.
2. Ka warheynta, ra'yi ka bixinta arrimaha la xiriira Canshuuraha iyo dhaqaalaha dalka
3. La talinta habka iyo farsamada baarista dembiyada la xiriira Sharciyada Maaliyadda.
4. Ilaalinta xeebaha iyo dekedaha gudahooda
5. Baarista iyo warbixin ku saabsan canshuuraha toosan iyo kuwa dadban
6. Nidaaminta, xafidaadda iyo hagaajinta faylasha u gaarka ah Ganacsatada (Archivio)
7. La dagaalanka iyo dabar goynta kotorobaanka iyo mukhaddaraadka.
8. Maamulidda , xiriirinta, isku duba rididda hawlaha boliiska xaga canshuuraha iyo dhaqaalaha
9. Ka warqabidda iyo la socodka goobaha kotorbaanka kasoo galo xaga badda iyo barriga.
10. Waa in la aqoonsadaa had iyo jeer, lala socdaa dhaqdhaqaaqa shakhsiyaadka ama kooxda mehradeedu tahay ama lugu tuhunsan yahay in ay ka ganacsadaan Kontrobaan
11. Waa in lala socdaa badeecadaha lagu keeno L/C siiba kuwa daruuriga u ah nolosha dad weynaha, meelaha lagu kaydiyo, qiimaha la siiyo IWM.

12. Ka qaybgalka sugidda Nadangelyada marka loo baahdo, howshaas oo ay u hoos imaanayaan qaybaha ama saldhigyada caadiga ah ee Boliiska Gobolka.
13. Xannaanaynta , dhaqaalaynta, iyo ka warhaynta gaadiidka, guryaha, hubka iyo alaabta kale ee looguu talagay fulinta hawlaha Ciidanka iyo daryeelka Ciidanka.
14. Maamulidda , tababaridda , xannaanada iyo hanuuninta Ciidanka.
15. Iskuxeridda iyo wadashaqaynta Boliiska iyo hay'adaha kale ee dawliga ah
16. Waxaa reeban in badeeco laga soo geliyo ama laga saaro meel aan furdo ahayn.
17. Gaadiidka badda ma istaagi karo meel ka baxsan nawaaxiga furdada ama dekadda
18. Kontroolidda iyo dib u eegidda badeecadaha marka furdadu ay soo canshuuraan iyadoo laga eegayo xaga tirada, noocyada, iyo canshuurtii laga qaaday .
19. Ilaalinta maraakiibta ama doonyaha inta ay joogaan dekedda gudaheeda ; si aan looga soo dejinin badeeco aysan la socon masuuliyiinta furdada ama aan loo saarin badeecad aan rukhsad lahayn.

## Qodobka 12aad

## Astaanta Ciidanka Boliiska labada heer

- Ciidanka Boliiska hadda dhisan waxaa lagu aqoonsadaa astaan u gaar ah ee uu kaga duwan yahay Ciidamada kale ee Dalka.
- Waxaa astaanta loo kala saari doonaa mid heer qaran iyo mid heer gobol.
- Waxaa loo qaadanayaa astaanta hadda jirta inay tahay mid qaran.
- Boliis Goboleedka waxaa intaa u dheer inuu xirto astaan u gaar ah Dawlada Goboleedka uu ka tirsan yahay.

## Qodobka 13aad

## Wadashaqaynta iyo isku xirka Boliiska Federaalka iyo kan Dawlad-goboleedyada

- Wasiirka Amniga Gudaha ee Qaranka iyo Wasiirada Amniga Maamul Goboleedyada waxay kumayaan 3 bil mar.
- Taliyaha Ciidanka Boliiska Federaalka iyo Taliyeyaasha Boliiska Goboleedyada waxay kulmayaan 2 bil mar.
- Guddiga Farsamo waxay kulmi doonaan bishiiba mar 3 maalin oo isku xigta.
- Waxaa kaloo jiri doona xog-isweedaarsi maalinla ah oo subax walba la kala qaato warsubxeedka.
- Kulama xilliyeysan waa in marba meel lagu qabtaa.

## Qodobka 14aad

## Kor Kala Socodka Hawsha Ciidanka Boliiska

- Ciidanka Boliiska Federaalka waxaa kor kala soconaya Wasaaradda Amniga Gudaha iyo Guddiga Ammaanka Baarlamaanka Federaalka.
- Ciidanka Boliiska Dawladgoboleedyada waxaa kor kala soconaya Wasaaradaha Amniga Dawladgoboleedyada iyo Guddiga Ammaanka Baarlamaan goboleedyada.

## Qodobka 15aad

## Mabaadii' Guud

- Wixii laga waayo Heshiisyada wadashaqaynta waxaa loola laabanayaa Sharciyadii hore ee Boliiska.

- Wixii u baahan talo sharci waxaan kala tashanaynaa Khubarrada Sharciga ee soo diyaariyay qoraalkan.